DX 210081

Somali | Soomaali

**OFFICIAL**

<Title> <Given Name> <Family Name>
<Address 1>
<Address 2>
<SUBURB STATE POSTCODE>

Ma u baahan tahay nooc la fasiray?

**Iskaan garee QR koodhka**

Ama booqo **homes.vic.gov.au/high-rise-victoria-renter-updates**

Mudane <Title><Surname>

Waxaan u mahad celinaynaa xubnaha jaaliyada Flemington iyo North Melbourne ee kiraystayaasha ah ee kasoo qayb galay madashii dhowaan la qabtay, iyo boqolaalka qof ee nala soo hadlay isla markaasna siyaabo kala duwan ra'yigooda noogu soo gudbiyay. Aad bay waxtar u lahayd in aan maqalno su'aalahaaga oo aan idiin la hadalno dhawrkii toddobaad ee la soo dhaafay.

Waxaan kale oo u mahad celinaynaa kiraystayaasha ballan la sameeyay kooxdayada Dib-u-dejinta.
In badan oo idinka idin ka mid ah hadda waxaad la kulanteen kooxdayada oo waxaad bilowdeen inaad nala wadaagtaan baahiyihiina iyo waxaad jeceshihiin. Sidaan idinka ballan qaadnayba, waxaan qoraalkan idinkugu soo dirayaa inaan idiin soo gudbino macluumaadka ku saabsan xuquuqdiina iyo fursadahiina inta lagu guda jiro nidaamka dib u dejinta.

## Ixtiraamka, daryeelka, iyo taageerada kiraystayaasha

Waxaan rabaa inaan caddeeyo sida ay nooga go'an tahay inaan la shaqeyno dhammaan kireystayaasha - kooxdayadu waxay had iyo jeer kuula dhaqmi doonaan si ixtiraam iyo daryeel ku jiro. Ujeedadayadu waa inaan ku siino macluumaadka aad u baahan tahay si aad naftaada iyo qoyskaagaba ugu gaadho go'aamada ugu fiican.

## Guryo fiican oo loogu talagalay kiraystayaasha

Hadafkayagu waa inaan siino kireystayaashayada guryaha ugu fiican ee aan awoodno.
Dabaqyadeena dhaadheer ee hadda dhisan waxay ku dhow yihiin dhammaadka noloshooda shaqo. Waxaan ognahay inay jiraan dhibaatooyin xagga naqshadeynta iyo da'da guryaha taasoo micnaheedu ay tahay in shaqaalaha dayactirka sameeya ay ku adag tahay in qof kasta waxa uu filanayo uu helo. Waxaan rabnaa in kireystayaasha ay helaan guryo raaxo leh oo leh meel bannaan oo gaar ah iyo musqulo casri ah. Waxaan u baahanahay guryo badan oo ka turjumaya baahida qoysaska, iyo sidoo kale dadka da'da ah.

## Muhiimadda ay leedahay in bulshadu ay sii ahaato mid awood leh

Waxaan rabnaa inaan kaa caawino in bulshada awooda leh ee aad dhistay ay sii ahaato mid jirta, waana sababta aan u bixinayno xulashooyin guri oo u dhow Abbotsford St iyo Victoria St.

## Soo eegida guryaha cusub ee Victoria St iyo Abbotsford St

Dadka xiisaynaya, waxaanu siin doonaa fursado ay kusoo eegaan guryahan cusub si aad indhahaaga ugu soo aragto nooca iyo tayada guryaha dhawaan la heli doono.
Haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato guryahan cusub, fadlan la hadal kooxda taageerada dib u dejinta.

50 Lonsdale Street,
Melbourne Victoria 3000
GPO Box 4057, Melbourne Victoria 3001

## Maxaa dhacaya markaan la kulmo kooxda Dib-udejinta?

Ballantaada kooxda Dib-u-dejinta waxay qaadan kartaa inta u dhaxaysa 30 daqiiqo ilaa hal saac. Ballantaada:

- Waa lasoo dhawaynayaa inaad usoo kaxaysato ballanta saaxiib ama qof ku caawiya.
- Kooxdayadu waxay kuu qaban doonaan turjubaan markaad ballanta qabsatid.
- Kooxdayadu waxay ku weydiin doonaan baahiyahaaga guri. Tan waxaa ka mid noqon kara:
  - → imisa qof ayaa ku nool gurigaaga.
  - → baahiyaha ku aadan qaabka aad adiga iyo qoyskaaga u geli kartaan guriga.
  - → waa maxay noocyada adeegyada caafimaadka, dugsiga ama taageerada aad isticmaali karto.
  - → Iyo xidhiidhada dhaqameed ee degaankaaga oo ay ku jirto xidhiidh kasta oo ay la yeelan karaan deganeyaasha Ummadaha Koowaad (First Nations) dalka.
- Kooxdayadu waxay ku bixin doonaan waqti si ay kuu bartaan oo ay kugula jaanqaadaan xawaare adiga kugu habboon.
- Kooxdayadu waxay kaala hadli doonaan wakhtiga dib u dejinta ay dhacayso si ay u yareeyaan carqalad kasta oo noloshaada ku imaan karta, oo ay ku jirto tixgelinta baahiyaha dugsi ee carruurta.
- Ku weydiin doonaan wixii ku saabsan baahi kasta oo kale oo laga yaabo inaad qabto.

Kooxdayadu waxay ku qori doonaan baahiyahaaga foom ay ayagu saxiixi doonaan oo ay ku weydiin doonaan inaad adigana saxiixdo.

Saxiixaagu wuxuu xaqiijinayaa inaan fahannay baahiyahaaga iyo inaan si sax ah u qornay macluumaadkaaga. Waxaan helnay su'aalo ku saabsan foomkan, waxaanan rabnaa inaan xaqiijino in tani**aysan ahayn** heshiis kireysi ama heshiis mana beddelayso xuquuqdaada. Foomku wuxuu kaliya uu noo ogolaanayaa inaan samayno codsiga wareejinta guriyaynta anagoo adiga kaa wakiil ah. Kani waa codsigaagii, oo waxaad codsan kartaa in la beddelo wakhti kasta marka baahiyahaaga ama dookhyadaadu isbeddelaan.

## Xaq ma u leeyahay in aan ku laabto guri cusub oo ku yaala deegaanka?

Haa - Ka kireyste ahaan u baahan inuu guuro, waxaad xaq u yeelan doontaa inaad soo noqoto - haddii aad go'aansato inaad sidaas samayso. Waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad la hadasho kooxdayada si ay kuugu helaan xulashooyin guri oo daboolaya baahiyahaaga.

## Maxay noqon doonaan xulashooyinkayga guriyeynta?

Kooxdayadu waxay ku bixin doonaan waqti si ay u fahmaan baahiyahaaga guri, sida inta qof ee qoyskaaga ay ka kooban yihiin, dugsiyada ama adeegyada aad isticmaasho, iyo haddii aad doonayso inaad u dhawaato ama u guurto meel cusub. Macluumaadkan ayaa ka caawin doona kooxdayada inay kuu helaan xulashooyin guri oo daboolaya baahiyahaaga.

## Kiradaydu miyay isbedeli doontaa?

Maya – inta lagu jiro dib-u-dejinta, kirada aad jeebkaaga ka bixiso isma beddeli doonto. Haddii aad go'aansato inaad u guurto guryaha bulshada (community housing), waxaa laga yaabaa inaad hesho Caawimada Kirada ee Dawlada Dhexe (Commonwealth Rent Assistance). Tan waxaa guud ahaan la filayaa in la siiyo kuwa guryaha bixiya, laakiin mararka qaarkood waxa laga yaabaa inay hoos u dhigto kharashaadka jeebkaaga ka baxaya.

## Xuquuqda hadda aan leeyahay iyo kirada sidooda miyay sii ahaan doonaan?

Haa. Xuquuqda hadda aad leedahay ee guriga iyo kirada inta jeebkaaga ka baxayso isma beddeli doonto.

## Waa maxay xuquuqaha iyo ilaalinta ay kireystayaasha ku leeyihiin guryaha bulshada?

Kiraystayaasha guryaha bulshada waxay leeyihiin xuquuq la mid ah tan kiraystayaasha guryaha dadweynaha/dowlada waana mid la xaqdhowro sida uu qabo Sharciga Kiraysiga Deegaanka ee 1997 (Residential Tenancies Act 1997).

50 Lonsdale Street,
Melbourne Victoria 3000
GPO Box 4057, Melbourne Victoria 3001

## Waa maxay guryaha bulshada?

Hay'adaha bixiya Guryaha Bulshada waa ururro aan faa'iido doon ahayn oo bixiya guryaha bulshada. Waxa nidaamiya dawladda waxayna u hoggaansamaan heerarka hawl qabad shuruucdoodu adag yihiin oo lagu dejiyay Xeerka Kiraysiga Deegaanka ee 1997.

## Guryaha cusub ma waxay noqon doonaan guryo bulsho?

Meesha ugu horeysa ee dib u dhiska lagu sameeynayo waa Elgin St ee Carlton. Qorsheynta ayaa ka bilaabatay daarahan, waxaana la xaqiijiyay inay yihiin guryo dadweyne/dowlad.

Go'aanka ku saabsan in saraha dhaadheer ee North Melbourne iyo Flemington ay noqon doonaan kuwo dadweynaha ah, ama guriyo bulshada ah weli lama gaarin maadaama aan ku jirno marxaladaha qorsheynta hore. Waxaa muhiim ah in la ogaado in dowladdu ay ballan-qaadday in boqolkiiba 10 guryo dadweyne oo dheeri ah la dhiso taasoo qayb ka ah dib-u-kobcintan. Markaa, waxaa jiri doona guryo dadweyne oo badan, ma yaraan doonaan. Waan kuu sheegi doonaa waxa laga dhisi doono goobahan markaan ogaano taas.

## Haddii aan u guuro guryaha bulshada, lacag dheeraad ah oo biyaha ah miyaan bixinayaa?

Haddii aad doorato inaad u guurto Abbottsford St ama Victoria St, ma bixin doontid lacag dheeraad ah oo biyaha ah.

## Sideen ayaan uga sii ag dhawaan karaa bulshadayda?

Mid ka mid ah farriimaha ugu xooggan ee ka soo baxay golayaashii iyo kulannadii kale ee ilaa hadda la qabtay, ayaa ahaa sida ay dad badan muhiimad ugu leedahay bulshada.

Inta lagu guda jiro wadahadalada qoyskaaga ay la yeelanayaan kooxdayada Dib-u-dejinta, waa inaad la wadaagtaa dadka, meelaha iyo adeegyada muhiimka kuu ah.

Deganeyaasha Ummadaha Koowaad (First Nations) ayaa sidoo kale waxaa loo tixgalin doonaa ku xirnaanshaha dalka in ay tahay qayb ka mid ah habka dib u dejinta.

Kooxda Dib-u-dejinta ayaa kula shaqayn doonta si markaas ay isugu dayaan inay kaaga helaan guri xaafadaada haddii aad markaas doonayso, kuwaas oo ay ku jiraan guryaha cusub ee Abbotsford Street iyo Victoria Street.

## Homes Victoria ma dabooli doonaan kharashka guuritaanka?

Haa - kharashaadka guuritaanka waxa dabooli doona Homes Victoria.

## Ka fekerida dalabyada aad heysato

Waxaan fahamsanahay in laga yaabo inaad u baahato wakhti aad uga fakirto fursadahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad lasoo hadasho asxaabta ama qoyska oo aad mar kale la hadasho kooxdayada.

Waa la soo dhaweynayaa haddii aad usoo kaxaysato saaxiib ama qof taageere ah wada hadal kasta, waxaanu kuu qaban doonaa turjubaan wadahadal kasta.

## Baraayfasiga (privacy)

Sida caadiga ah had jeer, waxaanu kaliya u isticmaali doonaa ama u wadaagi doonaa macluumaadkaaga si waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta iyo Baraayfasiga 2014 (Privacy and Data Protection Act 2014) iyo Xeerka Diiwaanka Caafimaadka 2001 (Health Records Act 2001)

## Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno

Shaqaalaha guriyeynta ee aad aragto maalin walba, iyo kooxda dib u dejinta ee kula kulmay, waxay halkan u joogaan inay ku siiyaan macluumaad iyo taageero. Had iyo jeer waxay kuula dhaqmi doonaan si ay ku jirto ixtiraam iyo daryeel. Waxay leeyihiin waayo-aragnimo badan waxayna kaa caawin karaan inaad ka fakirto fursadahaaga.

Waxaad la xidhiidhi kartaa shaqaalahaaga kaalmaynta dib u dejinta wakhti kasta adigoo kala xidhiidhaya faahfaahinta xidhiidhka ee lagugu siiyay. Haddii aadan heli karin macluumaadkan xiriirka, fadlan la xiriir xafiiska guiryeynta deegaankaaga si aad u codsato kuwaas.

Waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad la xiriirto haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Mar kale waad ku mahadsan tahay rayi'gaaga, sida aad noola soo xiriirtay iyo dulqaadkaaga. Tani waxay qaadan doontaa wakhti waxaana naga go'an inaan kula shaqayno si aan u daboolno baahiyahaaga oo aan kuu caawino si kasta oo aan awoodno. Caawin markasta, iyo meel kasta oo aan awoodno.

Mahadsanid

**Simon Newport**
Madaxa fulinta
Homes Victoria

17 / 11 / 2023

50 Lonsdale Street,
Melbourne Victoria 3000
GPO Box 4057, Melbourne Victoria 3001